



Laboratory Services

URURIN KAADI

Fariimo Ururin ah Dhex ka Qabasho Nadiif ah

Fariimo:

1. Ururinta, waxa laguu siiyay waxyabahan soo socda:
 - Weel saambal oo leh fur la maroojiyo oo jeermi-dilan oo midabkiisu yahay buluug
 - Tuwaal/Shukumaan yar
 - Waraaq fariin
 2. Ku qor weelka kaadida **magacaaga hore iyo ka dambe, taariikhdaada dhalasho iyo taariikhda iyo wakhtiga** ururinta. Haddii ay ku sii qoran yihii weelka, hubi in magacaaga koowaad iyo dambe iyo taariikhdaada dhalasho sax yihii.
 3. Si dhammeystiran gacmahaaga ugu dhaq saabuun iyo biyo.
 4. Koobka saambalka ka qaad daboolka oo meel dhig iyada oo dhinaca isku siman uu hooseeyo. Ha taaban gudaha daboolka, si aan wax kale u raacin. Midda kale, HA ka fujin dhejiska hurdi/jaale ah ee saaran daboolka buluug ah.
 5. **DUMARKA:** Kala qaad laalaabka maqaarka ee ku wareegsan ibta/daloolka kaadida. Aagga ku dhaq tuwaal/shukumaan yar, adiga oo mariska markasta ka bilaabaya xagga hore oo dib u wadaya.
- RAGGA:** Dhaq madaxa guska, oo uu ku jiro ibta/daloolka kaadida, adiga oo isticmaalaya tuwaal/shukumaan yar.
6. Kaadida ku sii daa musquusha dhawr sekan ka dibna jooji. Weelka kaadida ku toosi jidka kaadida iyada oo aan weelku taaban maqaarka aagga.
 7. Dib u bilaw kaadida oo kaadida ku ururi weelka. Ha buux dhaafin weelka.
 8. Si adag furka u xidh oo iska ilaali inaad taabatid gudaha weelka.
 9. Saambalka kaadida ee aad ururisay dhig aagga loogu talogalay, adiga oo raacaya fariimaha shaqaalaha shaybaadhka.
 10. Haddii aan saambalka lagu ururin goob adeeg bukaan oo ah OhioHealth Laboratory Services, saambalka gali qaboojiye oo ku soo qaad baraf, isaga oo ku jira bac leh qful ah siib/jinyeer oo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah u keen shaybaadhka.

OhioHealth
BELIEVE IN WE™